

# PACE – Provider Access to a Community Equivalent (Helitaanka Adeeg-bixiyaha ee Bulshada)

## Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

### Wax ka Ogow PACE – Provider Access to a Community Equivalent (Helitaanka Adeeg-bixiyaha ee Bulshada)

**Q: Waa maxay dariiqa tababarka bulshada?**

**A:** Tababarka bulshada, ee imika loo yaqaan PACE – Provider Access to a Community Equivalent (Helitaanka Adeeg-bixiyaha ee Bulshada), waa ikhtiyaar u dhigma in lagu buuxiyo shuruudaha liisanka waxbarashada ee doorarka barbaarinta kuwaasoo u baahan shahaado hore ama kooban (kalkaaliyayaal macalimiina, hogaamiyayaal macalimiina, iyo cid liisan haysta oo qoyska ah).

**Q: Maxaa tababarkan imika loogu bixyey PACE?**

**A:** Imika madaamoo kani yahay barnaamij rasmiya, DCYF waxay dibu ugu magacaabaysaa barnaamijka si ay u kala saarto dariiqan. Markii hore loo yaqaanay dariiqa tababarka bulshada, PACE waxa la bilaabi doonaa 2022.

**Q: Waa maxay sababta tababar u dhigmaa u jiro?**

**A:** DCYF waxay la shaqaysay daneeyayaal badan ka dib markay kala dooday sharci sameynta WAC 110-300. Xubnaha bulshada ayaa sheegay inay rabaan inay helaan tababar bulsho si u buuxiyaan shuruudaha waxbarashada cusub. Shaqada Kooxda u Dhiganta (2018 – 2019) waxay sidii wadeen dariiqa kordhinta horumarka tababarka. Abril 2020, HB 2556 waa la ansixiyey waxayna hagtay horumarka dariiqa tababarka bulshada, imika loo yaqaan PACE. Macluumaad badan, booqo <http://lawfilesexp.leg.wa.gov/biennium/2019-20/Pdf/Bills/Session Laws/House/2556-S.SL.pdf?q=20200714144807>.

**Q: Maxay PACE ka kooban tahay?**

**A:** PACE waa taxane tababar kaasoo dhisaaya tababarada loo baahan yahay ayna ku jiraan:

- Asaasiyaadka Daryeelka Cunuga
- Enhancing Quality of Early Learning (Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Barbaarinta) (Sanadaha 1 iyo 2)
- Qeybaha PACE – Ka ib dhameystirka tababaradan seeska ah, adeeg-bixiyayaashu waxay dhameystiri doonaan labo qybood oo PACE iyo Barashada Shaqada. Si aad waxbadan uga ogaatid sida Barashada Shaqadu ka qeyb uga tahay dariiqan, dibu eeg daabacaadan Hordhaca Barnaamijka PACE (EPS\_0071) onlaaynka [www.dcyf.wa.gov/publications-library/eps\\_0071](http://www.dcyf.wa.gov/publications-library/eps_0071).

**Q: Goormaa la helayaa tan?**

**A:** Tijaabada waxa laso gabagabeeyey Juun 2021. DCYF waxay ka shaqeynaysaa kordhinta helitaanka iyo awooda ikhtiyaarkan. Tababarka noocani wuxuu bilaabmayaa wakhti danbe Janaayo 2022.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

**Q: Intee inleeg ayuu igu qaadan doonaa inaan dhameystiro PACE?**

**A:** Adeeg-bixiyayaasha Waxbarashada Barbaarintu waxay isticmaala PACE si ay u buuxiyaan shuruuda waxbarashada oo shaqeynaysa shan sano laga bilaabo taariikhda la shaaaleysiiyey ama la dalacsiyey si lo dhameystiro PACE. Adeeg-bixiyayaashu waxay awoodaan inay ku socdaan xawaarahooda waxayna ku dhameystiri karaan wakhtigooda. Wadarta tababarka dariiqu waa:

- Asaasiyaadka Daryeelka Cunuga - 30 saac
- Enhancing Quality of Early Learning (Kor u Qaadista Tayada Waxbarashada Barbaarinta) – 20 saac
- Adeeg PACE Tababar Dheeriya – 40 saac
- Brashada Shaqada - 30 saac

**Q: Luuqadahee ayaa lagu bixin doonaa PACE?**

**A:** Waxa lagu bixin doonaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Soomaali.

**Q: Sidee PACE loo heli doonaa?**

**A:** PACE waxa lagu heli doonaa tagista qofka iyo onlaayn.

**Q: Maxaan sameyn karaa intaan sugaayo qeybaha PACE inaan helo?**

**A:** Inta qeybaha cusub PACE ee la sameeyey aan la helayn ilaa mardanbe Janaayo 2022, adeeg-bixiyayaasha waxbarashada barbaarinta ayaa hubin kara inay ku haboon yihiin ikhtiyaarkan iyagoo hubinaya doorkooda MERIT. Adeeg-bixiyayaasha ayaa dhaeystiri kara Child Care Basics iyo EQEL ka hor bilaabida qeybaha PACE.

**Q: Miyey MERIT ii sheegi doontaa inaan ku haboonahay inaan dhameystiro tababarkulshada?**

**A:** Oktoobar 2021, shahaadooyinka MERIT ayaa la heli doonaa. Halkaasi, adeeg-bixiyayaasha ayaa awoodi doona inay xushaan ikhtiyaarka ay rabaan si u buuxiyaan shuruudaha tacliinta. Haddii aad ku haboon tahay tababarkan noocan ah, waxaad awoodi doontaa inaad ka xulatiid sanduuqa hoose tan.

**Q: Miyaa PACE qofkastaaba heli karaa?**

**A:** Maya, PACE waxa kaliya heli kara waxbarashada barbaarinta ee u baahan shahaado hore ama kooban. Tani waxa ku jiri liisan haystayaasha guriga, hogaamiyayaasha macalimiinta, iyo kalkaaliyayaasha macalimiinta ah. PACE ma buuxinayso Shuruudaha Horumarka ECEAP kumana haboona Dhibcaha Horumarinta Aqoonta Barbaarinta.

**Tababar**

**Q: Miyaa PACE lagu xisaabiyaa saacadaha adeega sanadlaha?**

**A:** Haa, ka qeybgalka tababarada PACE waxa lagu xisaabiyaa shuruudaha tababarka adeega sanadlaha.

**Q: Ma inaan dhameystiraabaa EQEL haddii lay shaqaaleysiiyey ka hor Ogos 1, 2019?**

**A:** Haddii lagu shaqaaleysiiyey ka hor Ogos 1, 2019, oo aad rabtid inaad dhameystirtid PACE shuruuda waxbarasho, EQEL uma baahan doonto in loo dhameystiro ka qeyb ahaan tababarkan.

**Macluumaad Dheeriya**

**Q: Miyaaan ogahay in dariiqani aad iigu fican yahay aniga?**

**A:** Waxa muhiima inaad dooratid dariiqada aadka ugu fican hadafyadaada. Waxaad isticmaali kartaa Hagaha Professional Development Plans (PDP) ee Adeeg-bixiyayaasha Waxbarashada Barbaarinta si aad waxbadan uga ogaatid ikhtiyaar kasta.

**Q: Yaan la xidhiidhaa si aad u helo macluumaad badan?**

**A:** Haddii aad u baahan tahay caawimo dheeriya, fadlan lasoo xidhiidh MERIT Workforce Registry Support Team. Iimayl: [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov)  
Teleefon 1-866-482-4325, ikhtiyaarka 5